# Khatarta suurtaggalka ah ee la xiriirta dorooniska



Maxaad samaynaysaa haddii aad hesho ogeysiiska khatarta ee ku saabsan halista dorooniska ama aad aragto doroon dhulka ku soo dhacday?

**Hay'adaha dowladda ayaa bixin kara ogeysiiska ama wargelinta khatarta ah, haddii xaaladdu ay tahay mid halis ku ah nafta, caafimaadka ama hanti muhiim ah.** Ogeysiiska khatarta drooniska waxaa loo diri karaa deegaan ballaaran, sababtoo ah way adag tahay in la saadaaliyo dhaqdhaqaaqa degdegga ah ee dorooniska. Waxaa dhici karta in doroonisku ay badan yihiin, islamarkaana ay gaareen aag ballaaran.

Hay'adaha dowladda ee arrinkaan ka mas’uulka ah waxaa ay si joogto ah u qiimeeyaan heerka khatarta, iyadoo lagu salaynaayo xogta la hayo ee arrinkaas la xiriirta. Ogeysiiska khatarta waxaa uu ku salaysan yahay qiimeynta xogtaas. Marka ogeysiis la bixiyo, khatartu waa mid dhab ah. Maadaama aan xaaladda la sii saadaalin karin, dadka waa in goor hore loo sii digo, si qof walba uu uu u helo wakhti uu ku raadsan karto meel gabbaad ah oo uu gudaha u galo.

**Raac hagista ama tilmaanbixinta ay ku siinayaan hay’adaha dowladda, oo waxaad gashaa gudaha**. Marka ay jirto khatar dhanka dorooniska ah, hay’adaha dowladdu waxaa ay dadka kula talinayaan in ay gabbaad ka dhigtaan gudaha dhismayaasha, sababtoo ah bannaan socodku ma ahan arrin ammaan ah. Haddii doroonisku ay wataan walxo qarxa, waxaa ay sababi karaan cadaadis iyo firir dhaawac leh, sidaas darteed in gudaha dhismayaasha gabbaad laga dhigto waa arrin aad muhiih u ah. Inta badan muddada gabbaadka lagu jiro waa mid gaaban, sida badan waa dhowr saacadood oo keliya. Hay’adaha dowladda waxaa ay muddo kaddib bixin karaan hagis ama tilmaanbixin dheeraad ah iyo xogo muhiim ah oo ku saabsan xaaladda.

**Haddii aad hesho ogeysiiska khatarta ee ku saabsan dorooniska halista ah, sidan soo socta samee:**

**Waxaad gashaa gudaha.**

**Haddii aad joogto gudaha:**

- ha soo bixin oo gudaha ku jir, kana fogow daaqadaha iyo albaabbada.
    - Gudaha inta lagu jiro waxaa habboon in la joogo dhexbartanka qolalka ee dhismaha, kuwaasoo leh darbi aad u xooggan.

**Haddii aad gaari ku jirto:**

- gaariga ka deg, oo waxaad gashaa gudaha dhismaha.

  - Darawalka gaariga waxaa ay mas'uuliyad ka saaran tahay, in uusan gaariga dhigin, meel dhibaato ama caqabad ku noqon karta in ay maraan gaadiidka qaabilsan gurmadka degdegga ah.

**Haddii aadan gudaha geli karin:**

- Raadi meel sida ugu suurtaggalsan gabbaad kuu noqon karta, taasoo leh darbiyo ama waxyaabo kale oo kuu noqon kara gabbaad wax kaa celiya.
  - Haddii aad dhulka joogto oo aad aragto doroon, isku day intii aad awooddo in aad gabbaad ka dhigato meel ka hoosaysa dusha ama oogada dhulka, tusaale ahaan god ama gacanka yar ee biyomareenka ah ee waddooyinka dhinacooda ku yaalla.

Socodka bannaanka ee aagga ay khusayso khatarta laga digay, waxaa uu noqon karaa mid khatar ah, sidaas darteed waa muhiim in laga fogaado bannaanka oo la galo meelaha gudaha ah ee gabbaad ahaanta loo isticmaalo.  Ogeysiiska khatarta waxaa uu soconayaa wakhtiga ugu gaaban ee suurtaggalka ah, si loo yareeyo dhibka arrimahaas ka dhalan kara ee bulshada soo gaari kara.

Haddii aad ka shaqayso howl muhiim u ah bulshada ee khusaysa shaqooyinka xaaladaha degdegga ah, ayna waajib kugu tahay in aad shaqada tagto, raac hagista ama nidaamka shaqo bixiyahaaga. Weydii shaqo bixiyahaaga sida goobta shaaqada looga dhaqmo marka ay jirto xaalad khatar ah.
**Hay'adaha dowladda ayaa sheegaaya, marka xaaladda khatarta ah ay dhammaato**

Marka khatartu ay dhammaato, isla kanaalladii markii hore laga sii daayay ogeysiiska xaaladda khatarta ah ayaa laga sii dayn doonaa in xaaladdii khatarta ahayd ay dhammaatay. Ogeysiiska waxaa laga baahinayaa ablikeeshinka 112 Suomi, idaacadaha, bogga 112 ee qoraalka farriimaha ee telefishanka (Teksti-TV), iyo haddii loo baahdo telefishinka. Intaas waxaa dheer oo ogeysiiska xaaladda khatarta ah laga baahiyaa ablikeeshinka Yle, bogagga internetka ee 112.fi, pelastustoimi.fi, yle.fi, iyo bogga facebook-ga ee xarunta dhexe ee xaaladaha emerjensiga ama degdegga ah.

Haddii khatarta lagu sheegay qaabka codka ee digniinta dadweynaha ah, waxaa marka khatartu ay dhammaato la sii dayn doonaa astaan cod ahaan ah oo joogto ah oo deggan, kaasoo soconaaya muddo hal daqiiqo ah, waxaana uu tilmaamaaya in khatartii ay dhammaatay.

## Sideen sameeyaa haddii aan helo doroon dhulka ku soo dhacday?

Haddii aad hesho ama aad aragto doroon ama qaybo ka mid ah oo dhulka yaalla, **waa in aad ula dhaqantaa sidii adigoo helay wax ay suurtaggal tahay in uu qarxo.**

- **Ha u dhawaan hana taaban doroonka**. waxaa dhici karta in uu yahay mid ay waxyeello soo gaartay oo si fudud u qarxi kara. Ka fogoow oo tag masaafo u jirta meel ammaan ah (ugu yaraan 150 mitir).
- **Wac lambarka emerjensiga ee 112,** una sheeg xarunta xaaladaha emerjensiga ama degdegga ah arrinka taagan ee ku saabsan doroonka. Ka jawaab su'aalaha uu ku weydiinaayo shaqaalaha heeganka ee xarunta emerjensiga ama xaaladaha degdegga ah, islamarkaana raac tilmaanbixinta ama hagista lagu siinaayo.
- **U dig dadka kale ee jooga aagga laga helay doroonka**. Ha u oggolaanin cid kale in ay u dhowaato shayga la helay, hana ku faafin baraha bulshada meesha ama goobta aad joogto iyo sawirka daroonka toonna.
- **Cidna ha la wadaagin goobta aad joogto, ama sawirka daroonka ha dhigin** warbaahinta baraha bulshada.

## Maxaan sameeyaa haddii aan arko ama maqlo doroon?

- Xitaa haddii aan digniin rasmi ah la bixin, waa muhiim in aad xaaladda qiimayso, **oo aad taxaddar ama feejignaan sameyso.**
- Ha u dhawaan doroonka, hana isku dayin in aad adigu ogaato halka uu ka yimid. Kala soco xaaladda masaafo kuu jirta meel ammaan ah (ugu yaraan 150 mitir).
- Gudaha gal oo gabbaad ka dhigo, gaar ahaan haddii doroonka aad aragtay uu u muuqdo mid aan caadi ahayn ama jawi hoose ku duulaaya.
- Ka fogow meelaha bannaan ee doroonku ku dhow yahay. Haddii aad dhulka joogto, isku day in aad hoos uga gabbato heerka dhulka.
- Marka aad tagto meel ammaan ah, **la soco wararka iyo farriimaha ka imaanaaya dhanka hay'adaha dowladda.**
- **Wac lambarka xaaladaha emerjensiga ama degdegga ah ee 112, haddii**
    - aad doroonka ku aragto meel laga mamnuucay wax ku duulinta
    - doroonku uu ku duulaayo agagaarka meelo muhiim ah sida, warshad koronto, garoon diyaaradeed, dekad, xarun biyaha lagu sifeeyo, xarumo isgaarsiineed ama dhismayaal dowladeed.
    - aad hesho doroon dhulka ku soo dhacday
- **Ha u wicin lambarka 112 si aad u weydiiso su'aalo iyo xog ku saabsan xaaladda.**

## Isu diyaarinta xaaladaha doroonka

### Sidee ayaad hore ugu sii diyaar garoobi kartaa?

Xaaladaha khatarta ah si degdeg ah ayay u yimaadaan, sidaas darteed waa muhiim in la ogaado sida loo dhaqmo marka ay xaaladahaas jiraan. Si ehelkaagu ay si sax ah ugu dhaqmaan, hore uga wada hadla adiga, qoyskaaga, ehelkaaga iyo dadka kale ee aad xiriirka soke leedihiinba, waxa la samaynaayo ama qaabka loo dhaqmo marka ay jiraan xaaladaha kala duwan ee khatarta ah.

Hubi in adiga iyo dadka ehelkaaga ah aad telefoonnadiinna ku soo degsateen ablikeeshinka 112 Suomi. Oggoloow dhammaan macluumaadka uu ablikeehsinku kaa codsado, si aad u hesho wargelinta ama ogeysiiska ku saabsan khatarta, marka aad joogto aagga khatartu ay ka jirto. Si joogto ah u fur ablikeeshinka, oo cusboonaysii mar walba nooca ugu dambeeya ee ablikeeshinka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ablikeeshinka :112 Suomi, waxa aad ka heleysaa cinwaanka ineternetka ee ah: https://112.fi/112-suomi

Sidoo kale weydii shaqo bixiyahaaga sida goobta shaqada looga dhaqmo marka ay jirto xaalad khatar ah.

### Diyaargarowga milkiilayaasha dhismayaasha iyo dadka isticmaalaya ama gacanta ku haya, iyo sidoo kale goobaha shaqada

Marka laga reebo guryaha la deggan yahay, iskuullada, xarumaha daryeelka, dhismayaasha kale ee guud iyo goobaha shaqada, waa in la qorsheeyo sidii loogu diyaar garoobi lahaa xaaladaha khatarta iyo sidii ama qaabkii loo dhaqmi lahaa.

Waajibaadka isu diyaarinta waxaa ay khuseeyaan dhammaan dhismayaasha iyo howlwadeenada, xitaa haddii aan looga baahnayn dejinta qorshe badbaado oo rasmi ah.

Goobaha looga baahan yahay qorshaha badbaadada ee la xiriira diyaarinta hababka looga falcelinaayo khataraha kala duwan, waa qayb ka mid ah qorshaha badbaadada (Sharciga Badbaadada 379/2011, 15 §).

**14 § Isu diyaarinta iskaaga ah**

Milkiilaha dhismaha, qofka isticmaalaya dhismaha iyo howlwadeenka waxaa laga doonayaa in ay:

1. ka hortagaan dab iyo in ay dhacaan waxyaabo kale oo khatar ah
2. u diyaar garoobaan sidii ay u badbaadin lahayeen dadka, hantida iyo deegaanka marka ay jirto xaalad khatar ah.
3. u diyaar garoobaan daminta dabka iyo tallaabooyinka kale ee gurmadka ah ee ay awoodaan.
4. qaadaan tallaabooyin lagu sugaayo qaabkii looga bixi lahaa goobta haddii uu dab ka kaco, ama marka ay jiraan xaaladaha kale ee khatarta ah, iyo sidoo kale fududaynta hawlaha wax looga qabanaayo arrimaha gurmadka ama badbaadada ah (Sharciga badbaadada 379/2011).